

# XOG KOOBAN OO LAGA SOO URUURIYAY XARUMAHA ADEEGGA CAAFIMAADKA ASAASIGA AH EE KA FULINAYA BARNAMIJKA ALMANACH SOMALIA

ABRIIL 2021



## WAA MAXAAY ALMANACH

Waalidka waxaa muhiim u ah in uu hubiyo in cunugiisu helo daaweynta iyo daryeelka ugu wanaagsan ee la heli karo marka uu xanuunsado. Shaqaalaha caafimaad waxaa muhiim u ah in uu ku kalsoonaado go'aanadiisa iyo in lagu taageero shaqadiisa. Arintan darteed barnamijka ALMANACH ayaa loo sameeyay. Aqoonyahanno ayaa waxa ey ku soo koobeen waxyaabihii ugu danbeeyay cilmiga caafimaadka hal Tablet iyaga oo adeegsanaya shax si loo hubiyo talooyinka caafimaad ee ugu wanaagsan ee la heli karo iyada oo la raacayo shuruucda caalamiga ah ee caafimaadka.

Tabletka ayaa hagaya dadka bixiya adeegyada caafimaad si ey u raadiyaan astaamaha xanuun ee saxda ah, si ey u sameeyaan baaris dhameystiran, si ey u codsadaan shey-baar ey u baahanyihiin in ey go'aan sax ah iyo daaweyn sax sameeyaan, iyo haddii ey u baahdaan in ilmaha aanan lagu daaweyn Karin xarumahooda meelo kale u diraan. Barnamijka ALMANACH ayaa loogu talagalay in lagu isticmaalo xarumaha caafimaad xagga daawada, helitaanka shaqaalaha iyo tijaabooyinka sheybaar, waxaana isticmaali kara xirfadlayaasha caafimaadka oo ey ku jiraan dhaqaatiirta, kalkaaliyeyaasha, shaqaalaha caafimaad ee bulshada ee jooga meelaha fog-fog, oo agabku ku yaryahay. Markii aad cunugaada keento xarunta caafimaad, shaqaalaha caafimaad ayaa baaraya cunugaada iyaga oo

adeegsanaya Taabletka. Shaqaalaha caafimaad ayaa galinaya Taabletka xanuunka cunugaada, isga oo ka duulaya cabashooyinka cunugaada ayaa waxa uu siinayaa shaqaalaha caafimaadka kale waxyaabaha la ogaaday ee saxda ah, iyo sidii si fiicacan loogu daweyn lahaa. Adeegsiga barnaamijka ALMANACH, ayaa kuu fududeynaya adiga waalid ahaan sidii aad ku habsan laheyd in cunugaada loo daweynayo habkii ugu danbeeyay ee caafimaadka, ilmahaagu wuxuu heli doonaa talo caafimaad oo wanaagsan, waxaadna kaliya iibsana doontaa daawada loo baahanyahay. Shaqaalaha caafimaadka waa in aad ka dalbataa in ey isticmaalaan Taabletka marka ey cunugaada daweynayaan, arintaas oo faaiido u ah ilmaha.

Barnaamijka ALMANACH ayaa mar hore laga hirgaliyay Afghanistan iyo Nigeria hadana waxaa laga isticmaalaa xarumaha caafimaad ee Raadeer, Gubadleey, iyo Afgooye. Xarumo caafimaad oo dheeraad ah ayaa laga hirgalin doonaa mustaqbalka.

Almanach SRCS



# ALMANACH



**Bilow**



**Aan dhammaystirnayn**



**Ku rakib serverka**

Waxaad la xiriirtay ugu danbeyntii  
Serverka: 13 ott 2020



**Log out of  
CommCare**


Logged in: testengineer

# XOG KU SAABSAN HABKA UU CUDURKU DADKA U HALEELAY BISHA ABRIL

## BAARITAANADA

Bisha Abriil 2021, isugeyn 2328 caruur ah oo da'doodu u dhaxeeyo 2 ilaa 59 bilood ayaa la baaray iyada oo la adeegsanayo taabletka ALMANACH. Koror ayaa lagu arkay xarumaha caafimaad ee dhaqan galinayay ALMANACH bisha Abriil ka hor. Sababta ugu muhiimsan ayaa u muuqata in ay tahay hoos u dhaca xaaladaha Covid-19 gaar ahaan magaalada Muqdisho: dadka ayaa mar kale billaabay in ay tagaan xarumaha caafimaadka ay maadaama hoos u dhacday cabsida laga qabo faafitaanka Covid-19. Bisha Abriil, ALMANACH ayaa laga dhaqan galiyay sadex xarun caafimaad oo cusub, iyada oo arintani ay saameysay tirada guud ee baaritaanada la sameeyay: xarunta caafimaadk ee Holwadaag ee ku taalla Baydhabo, xarunta caafimaadka ee Farjanno ee ku taalla Kismayo iyo Beledweyne.

Ogoow! Haddii aanan si gaar ah loo xusin, dhammaan tirooyinka lagu sheegay xogtan waxa ay ku saleysanyihiin mudada xog tabinta SRCS ee ku siman 26ka Maarso ilaa 25ka Abriil, si la mid ah bilihii la soo dhaafay.




Kala saaridda bukaanada sida ay sheegeyso xog ururinta joogtada ah ee ALMANACH in 98% (n=2281) ee dhammaan baaritaanada la sameeyay bisha Abriil ay ahaayeen booqashooyin cusub halka 2% ay ahaayeen booqashooyin la socosho ah oo qorsheysan. Isugeynta baaritaanadan, 46.2% waxa ay ahaayeen dumar halka 53.8% ka mid ahna ay ahaayeen rag.

Dhammaan baaritaanada loo sameeyo caruurta ay da'doodu u dhaxeeyo 2-59 bilood ayaa la sameyn karaa iyada oo la adeegsanayo ALMANACH, xitaa haddii cudurrada la helo aysan u badneyn in ay noqdaan kuwa wax looga qabto ALMANACH. Arintan ayaa waxaa u sabab ah in qeybaha la xiriira ka hortagga iyo nafaqeynta ee shaxda ay wali muhiim u ahaan doonaan cunug kasta. Heerka ka faa'iideysiga ayaa la aaminsanyahay in uu ku dhowyahay 100% xarumaha caafimaadka, si kasta ha ahaatee xogta arintan ku saabsan ayaa wali ah mid aan is waafaqsaneyn xarumaha caafimaadka waxa ayna u baahantahay kor joogteyn dheeri ah.


# NUTRITIONAL SCREENINGBAARITAANKA NAFQAADA

Ka hor inta aysan sameynin baaritaanada ALMANACH, kalkaalisada qeybta caruurta 5ta sano ka yar iyo u ololeeyaha caafimaadka waxa ay qeybta sugitaanka ku qabtaan kulamo waxbarashada caafimaadka ah oo ku saabsan mowduucyo muhiim ah sida tallaabooyinka looga hor tagayo caabuqa Covid-19, shuban biyoodka daran oo ay la socoto sharraxaad ku saabsan faa'iidooyinka ALMANACH. Cabirka jirka (culeyska iyo cabirka gacanta) iyo heerkulka ayaa sidoo kale laga qaadaa caruurta 5ta sano ka yar, iyo caruurta u baahan daryeelka deg-degga ah oo loo aqoonsaday in muhiimad gaar ah la siiyo. Jaantuskan hoose ayey ka muuqataa xogta baaritaanka nafaqada ee bisha Abriil 2021.



1.9% (n=41) ka mid ah xaaladaha tirada guud ee caruurta la baaray ayaa loo aqoonsaday in ay qabaan nafaqo darro aad u daran (SAM), kuwaas oo 8 ka mid ah loo diray xarumaha dajinta xaaladda bukaannada maadaama lagu dhibaatooyin aanan lagu daweyn karin heerka bukaan socod eektada. 33 kale oo caruur ah oo qaba nafaqo darro daran oo annan qabin dhibaato kale ayaa loo diray xarumaha bukaan socod eektada. 10.4% (n=223) ka mid ah tirada guud ee caruurta la baaray ayaa laga helay nafaqo darro dhex-dhexaad ah (MAM) waxaana loo diray barnaamijka quudinta dheeriga ah (TSFP). Shaqaalaha caafimaadka ayaa siiya dadka xanaaneeya caruurta xog guud oo la xiriirta hab quudinta si looga hortago nafaqo darrada, iyaga oo sidoo kale hoosta ka xariiqna naas nuujinta aan wax kale lagu darin lixda bilood ee ugu horreysa. Xaddiga caruurta qabta nafaqo darrada daran ayaa la mid ahaa bishii hore (2.1%), iyada oo hoos u dhac yar uu ku yimid kuwa qaba nafaqo darrada dhex-dhexaadka ah 12.2% bisha Maarso). Nafaqo darrada ayaa aad ugu badan Afgooye, iyada oo isugeynta nafaqo darrada daran iyo midda dhex-dhexaadka ahi ay mar walba ka sarreeyaan 20%.

Sawirka hoose ayaa qeexaya habka ay dadka ugu yimaadaan xarumaha caafimaadka arrimaha la xiriira nafaqada.




## CUDURRADA

Guud ahaan 2328 baaritaan ee laga sameeyay lixda xarun caafimaad bisha Abriil, qeybaha cudurrada soo socda ayaa ahaa kuwa ugu badan ee la helay: caabuqa neef mareenka (oo ah 41.6%), xaaladaha xanuunnada ku dhaca caloosha (oo ah 10.6%), caabuqa dhagaha ( oo ah 6.4%) iyo caabuqa dhuunta (oo ah 6.1%). Si kasta ha ahaatee, ku dhawaad sadex meelood meel (oo ah 29%) oo ka mid ah caruurta ayaa laga helay xaalado aanan hadda lagu ogaan karin ALMANACH, oo ay ku jiraan tusaale ahaan xaaladaha maqaarka, dhaawacyada iyo gubashada. Caruurta ayaa waxa ay ku danbeyn doonaan kaliya ogaansho laxiriira nafaqeyn iyo ka hortag ee ALMANACH, sida “in aysan jirin nafaqo darro” ama “in aan loo baahneyn gooryaan dilid”.


## CAABUQA NEEF MAREENKA

Dhammaan xarumaha caafimaadka, caabuqa neef mareenka ayaa ah kan ugu badan qeybaha cudurrada kana dhigan 41.6% (n=969) ee baaritaanada. Sida ay sheegeyso xogta laga helayo shaqaalaha caafimaadka, qodobka ugu weyn ee sababaha xanuunkan ayaa nadaafad xumida dadka la rabay in wax laga ogaado.

Caabuqa neefmareenka sare oo iyana ka dhigan 86.4% (n=837) iyo oof wareenka oo ka dhigan 10.2% (n=99) ee caabuqa neef mareenka la diiwaan galiyay bisha Abriil, halka 3.4% (n=33) ay qabeen (Neefsasho sida foorida ah). 3 ka mid ah 6-da xarun caafimaad eek u shaqeeya ALMANACH waxa ay soo sheegeen xaalado oof wareen oo ku jira xaddiga caadiga ah (10-20%). Kooxda ALMANACH ayaa la socon doonta shaqaalaha caafimaadka ee Gubadhley si loo ogaado sababta xaaladaha oof wareenku ay uga badanyihiin meelaha kale.




Sawirka hoose ayaa muujinaya xaddiga Jeermis Dile loo qoray caruurta qaba Caabuqa neefmareenka sare. Dhinaca bidixda waxaa ku yaalla xarumaha horay u billaabay adeegsiga ALMANACH (Raadeer, Gubadleey and Afgooye), kuwaas oo dhammaantood ku jira xaddiga lagu taliyay (<15%). Dhinaca midigta waxaa ku yaalla xarumaha cusub ee ALMANACH, kuwaas oo dhammaantood muujinaya in Jeermis Dile badan loo qoray Caabuqa neefmareenka sare. Shaqaalaha caafimaadka ayaa sheegay in inta badan dadka caruurta xanaaneeya ay aaminsanyihiin in Jeermis Dile uu ku habboonyahay nuucyo badan oo ka mid ah caabuqyada ku dhaca neef mareenka sidaas darteedna ay ka filayaan shaqaalaha caafimaadka in ay caruurtooda u qoraan. Iyada oo la adeegsanayo doodaha todobaadlaha ah oo lala yeesho shaqaalaha caafimaadka iyo howlaha kor joogteynta, ayaa xarumaha cusub looga fadhiyaa in ay horumar sameeyaan bilaha soo socda.



## XAALADAHA XANUUNNADA KU DHACA CALOOSHA


Xaaladaha xanuunnada ku dhaca caloosha ayaa ka dhigan 10.6% ee dhammaan baaritaanada. 9.5% (n=220) ee dhammaan baaritaanada la sameeyay waxaa u sabab ahaa shuban biyood daran (AWD), iyada oo ay isku mid noqdeen sadexda xarun caafimaad laga billaabo Febraayo ilaa Abriil. Farjano ayaa sidoo kale laga soo sheegay tiradaas oo kale, iyada oo uu shuban biyoodka daran (AWD) ka dhiganyahay 9% dhammaan baaritaanada. Si kasta ha ahaatee, Beledweyne and Holwadaag ayaa laga soo sheegay 35% iyo 20%, sida ay u kala horreeyaan. Shaqaalaha caafimaadku waxa ay xoojin doonaan farriimaha gacmo dhaqashada iyo nadaafadda guud si looga hortago shubanka iyada oo mar horeba la galay xilli roobaadkii gobollada qaarna laga soo sheegay daadad. Xarumaha caafimaadku waxa ay heysteen tiro fiican oo ah ORS iyo zinc, sidaas darteed dhammaan caruurta laga helay shuban biyoodka daran (AWD) si ku habboon ayaa loo daweyay iyada oo la raacayo talooyinka ALMANACH.



## DHIIG YARIDA

ALMANACH waxa ay ku talo bixineysaa adeegsiga tijaabada dhiigga iyada oo la adeegsanayo hab gaar ah, laakiin caruurta waxa lagu aqoonsan karaa in ay qabaan dhiig yari daran iyada la adeegsano ALMANACH oo lagu saleynayo calaamado caafimaad. Bisha Abriil, 1% (n=24) ka mid ah caruurtii la baaray iyada oo la adeegsanayo ALMANACH ayaa laga helay dhiig yari. Qeyb ahaan waxa uu si joogto ah ugu sarreeyaa Gubadley (4.4% bisha Abriil), halka xarumaha badankood ay u muuqdaan in ay heystaan xaddi dhan 0-1%.

U hogaansanaan adage e u gubbinta bukaan waa qeyb ka mid ah ALMANACH: xaaladaha dhiig yarida waxaa lagu daweyyaa heerka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah muddo 2 bilood ah, inta lagu jiro labadaas bilood bukaanu waa in uu qiimeyn u yimaadaa xarunta caafimaadka labadii todobaad ee kasta. Caruurta qabta dhiig yarida aadka u daran waxaa si deg-deg ah loogu gudbiyaa isbitaal si dhiig loogu shubo caawinaad dheeri ahna loo siiyo. Aambalaasyada SRCS ayaa fududeeya ka qaadista bukaanada xarumaha caafimaadka Gubadley iyo Raadeer si loo geeyo isbitaallada Muqdisho.



## CAABUQA DHAGAHA

150 xaaladood oo caabuqa dhagaha ah ayaa la helay iyada oo la adeegsanayo ALMANACH bisha Abriil, oo ka dhigan 6.4% of dhammaan baaritaanada. Intii Maarso ayey xoogaa ka sarreysaa, markaas oo 4.6% ka mid ah baaritaanada ay sababeen caabuqa dhagaha. Daweynta ay ku talo bixisay ALMANACH ayaa ah in dhagaha la sifeeyo sadex jeer maalintii iyo waliba daweyn Jeermis Dile ah (Amoxil syrup) iyo barastamool xanuunka loogu talo galay. Caruurta ayaa sidoo kale lagu talo bixiyay in lala socdo 5 maalin ka dib si loo eego haddii ay xaaladdo ka soo reysa iyo in kale. Waxaa intaa dheer, waxaa jiray 10 caruur ah oo laga helay caabuqa dhagaha oo aad u daran oo dheecaan wata with. Caruurta ayaa lagu daweyyay goojada dhagah ee (gentamycin) iyo baristamool, iyada oo xanaaneeyeyaasha la baray sidii ay dhagaha u nadiifin lahaayee sadex jeer maalintii. Haddii aysan xaaladdu hagaagin muddo todobo bari ah, caruurta waa la gudbinayaa si loogu sameeyo baaritaan dheeri ah.

## CAABUQA DHUUNTA

Caruurta ka yar 5ta sano ayaa sidoo kale laga helay caabuqa dhuunta iyada ALMANACH uu u kala qeybiyay nuucyo kala duwan. Inta lagu jiray bisha, 142 xaaladood ayaa laga helay caabuqa dhuunta, oo ka dhigan 6.1% dhammaan baaritaanada. Koror muuqda ayaa la arkayaa marka loo barbardhigo 2.4% bisha Maarso. Shaqaalaha caafimaadka ayaa sababta ku sheegay in caruurta ay si joogto ah u cabaan biyaha qaboow habeenkii marka ay waalidkood afuraan. Inta ugu badan (94% or n=134) ee xaaladaha caabuqa dhuunta ayaa la xiriiyay feyras, kuwaas oo aan u baahneyn in Jeermis Dile lagu daweyyo laakiin kaliya u baahan in dhuunta lagu dajiyo maraq diirran, malab ama caanaha naaska iyada oo ku xiran da'da cunugga. Kaliya 6% (n=8) dhuun xanuun laga yaabo in ay sababtay bakteeriya waxaana loo dawo Jeermis Dile ah oo afka laga qaadanayo, barastamool iyo in xaaladdooda lala socdo sadex bari ka dib si loo ogaado in ay bogsadeen iyo in kale.

## CUDURRO KALE

42 xaaladood oo daaf ah ayaa la helay waana la daweyyay iyada oo la raacayo talooyinka ALMANACH, oo ka dhigan 1.3% dhammaan baaritaanada. Qeyb ahaan waxa la mid tahay intii Maarso (1.0%). Shan xaaladood oo jadeeco daran ah ayaa la soo sheegay, dhammaantoodna isbitaal ayaa loo diray si loo caawiyo. Waxaa jiray 2 xaaladood oo ah xanuun daran oo qandho watay loogan shakiyay in uu duumo yahay, laakiin ma jirin xaalado duumo ah oo baaritaan lagu hubiyay bisha Abriil.

# KA HOR-TAGGA


## FITAMIIN A IYO GOORYAAN KA DILIDDA

ALMANACH waxa uu si joogto ah u xasuusiya shaqaalaha caafimaadka haddii cunugga la siiyay Vitamin A iyo kaniiniga gooryaan dilidda lixdii bilood ee ugu danbeysay. Haddii aanan la siinin, ALMANACH waxa ay ku talineysaa in cunugga la siiyo Vitamin A iyo kaniiniga gooryaan dilidda. Guud ahaan 1632 caruur ah ayaa la siiyay vitamin A si xanuunka looga hortago halka 1273 caruur ahna la siiyay kaniiniga gooryaan dilidda. Shaxda hoose ayaa muujineysa qeybta caruurta u baahan Vitamin A iyo gooryaan dilidda caruurta oo dhan. Ka dib markii ayaa laga adeegsado ALMANACH xarun caafimaad, tirade ayaa hoos u dhaceysa maadaama ay caruurta ay horey u qaateen Vitamin A iyo kaniiniga gooryaanka booqashooyinkii hore.

	VIT A		GOORYAAN DILIDDA	
	#	% EE DHAMMAAN CARUURTA	#	% EE DHAMMAAN CARUURTA
Afgooye	559	69.5	436	54.2
Gubadleey	198	54.2	174	47.7
Raadeer	377	80.4	316	67.4
Beledweyne	57	67.9	39	46.4
Huwlwadaag	124	62.9	69	35
Farjanno	317	77.5	239	58.4
<b>Tiro guud</b>	<b>1,632</b>		<b>1273</b>	

## TALAALKA

Talaalku waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah tallaabooyinka lagu ilaaliyo caruurta 5ta sano ka yar. ALMANACH ma soo saarto xog ku saabsan talaalka caruurta la siiyay, laakiin halkan waa la soo saaray iyada oo la adeegsano shabakadda howlaha caafimaad ee ICRC (MAD), laga billaabo 1da Janaayo ilaa 30ka Abriil. Shaxda hoose ayaa muujineysa xogta talaalka lixda xarun caafimaad Janaayo ilaa Abriil, oo loo qaatay warbixin sanadle ah. Xarunta caafimaadka Afgooye ayaa muujineysa waxqabad fiican oo ah 51.8% Cudurka dabaysha iyo 28.4% oo ah jadeecada, halka xarunta caafimaadka Beledweyne ay muujineysa inta ugu yar. ALMANACH ayaa xasuusineysa shaqaalaha caafimaadka in ay hubiyaan xaaladda talaal ee caruurta baaritaan kasta ka dib, iyada oo loo eegayo xaaladdooda talaalka ayaa caruurta loo diraa goobta talaalka.



## GABAGABO

- Sadex xarun caafimaad (Farjanno, Howlwadaag iyo Beledweyne) ayaa dhaqan galiyay ALMANACH bisha Abriil. Dhaqan galinta ka hor, shaqaalaha caafimaadka ayaa la siiyay tababar 5 maalin ah oo ku saabsan ALMANACH iyo kulan waxqabad toosa ah.
- Kulanka doodaha shaqaalaha caafimaadka ee todobaadlaha ah ayaa la qabtay, iyada oo shaqaalaha loo abuuray fursad ay uga doodi karaan caqabaha taagan. Howlkarnimada sare ee ay shaqaaluhu soo bandhigaan todobaad kasta ayaa ah arinaka ugu muhiimsan ee horseedi kara guusha mashruuca ALMANACH, halka ay kooxda ICRC ka taageerto dhammaan shakiga iman kara, caqabadaha iyo su'aalaha soo bixi kara. Arin kale oo wanaagsan oo la ogaaday ayaa ah sida shaqaalaha qibradda leh ay diyaar ugu yihiin in ay caawiyaan kuwa ku cusub barnaamijka ALMANACH.
- Guud ahaan, tirada baaritaanada la sameeyay ayaa kordhay marka loo bar bardhigo bisha Maarso. Bisha Abriil, xaaladaha COVID-19 ayaa hoos u dhacay sidaas darteedna cabsida laga qabo cudurka ayaa hoos u dhacday, taas oo keentay in ay dadku mar kale yimaadaan xarumaha caafimaadka.
- Xanuunka ugu badan ee la baaray iyada oo la adeegsanyo ALMANACH ayaa wali ah caabuqa ku dhaca neef mareenka, waxaana soo raaca xaaladaha xanuunada ku dhaca caloosha. Bishan tirada caruurta xanuunada looga helay meel ka baxsan ALMANACH wey ka yaraayeen bishii Maarso (29% vs. 47%).

## CODKA KA IMANAYA GOOBTA SHAQADA

Intii lagu jiray doodda todobaadlaha ah ee shaqaalaha caafimaadka, Nasra oo ka socotay xarunta caafimaadka Gubadleey ayaa ku dhiirri galisay kalkaaliyeyaasha ka socday xarumaha cusub ee dhaqangaliyay ALMANACH waxa ayna tiri: “ALMANACH waa hage tallaabo tallaabo ah laga soo billabo baarista ilaa daweynta oo ay ku jirto xisaabinta qiyaasta saxda ah. ALMANACH waxa uu noo fududeynayaa shaqadeena waxa uuna kordhinayaa kalsoonida aan ku gaari karno helista cudurka oo sax ah”.

## TALLAABOYINKA XIGA

The ALMANACH team is preparing for the implementation of ALMANACH in the next batch of clinics, Kooxda ALMANACH ayaa diyaarinaysa ka dhaqangalinta ALMANACH sadex xarumood oo cusub (Hudur, Dusamareb iyo Galinsoor), ugu horreyn iyaga oo dood u qabanaya shaqaalaha caafimaadka iyo saraakiisha caafimaadka laamaha (BHOs) ka dibna u gudbaya wacyigalinta bulshada iyo qiimeynta aasaasiga ah. Kooxda ayaa sidoo kale sii wadi doonta kulamada caadiga ah ee shaqaalaha caafimaadka si looga doodo xogta billaha ah iyo caqabadaha ay la kulmi karaan. Kulanka caadiga ah ee shaqaalaha caafimaadka ayaa fursad u siinaya kooxda ALMANACH iyo shaqaalaha caafimaadka in ay is dhaafsadaan waxyaabaha ka cusub ALMANACH oo sidoo kale dhexdooda kala faa'iideystaan. Kooxda ayaa sidoo kale booqasho kor joogteyn ah u tagi doonta xarumaha caafimaadka si ay u hubiyaan in dhaqangalinta ALMANACH ay u socoto sidii la rabay, haddii ammaan ahaan ay suuro gasho. Ugu danbeyn, kooxda ALMANACH ayaa diyaarin doona qorshaha wareegga labaad ee korjoogteynta caafimaad ee xarumaha Farjano, Howlwadaag, iyo Beledweyne.

# SAAXIIBKA AAN SHAQO WADAAGGA NAHAY SWITZERLAND GUDAHEEDA

Barnaamijka ALMANACH ee Somalia waxa uu ka dhashay afar sano oo khibrad iyo rabitaan dhaba ah oo laga dhaxlay iskaashi adag oo dhexmaray Guddiga caalamiga ah ee Laanqeyrta cas iy heyadda Swiss TPH. Koox ka socota hey-adda Swiss TPH ayaa wax ka badaleysa barnaamijka shaxda caafimaadka sidoo kalena barogaraamineysa softiweerka, si barnaamijka ALMANACH uu mar walba u ahaado mid wata waxyaalihii ugu danbeeyay dhanka caafimaadka kuna habboon Soomaaliya.

Laakiin hey-adda Swiss TPH waa tuma? Hey-adda lagu magacaabo The Swiss Tropical and Public Health Institute (Swiss TPH, [www.swisstph.ch](http://www.swisstph.ch)) waa machad hogaaminaya caafimaadka aduunka si gaar ahna diiradda u saaraya dalalka dhaqaalahoodu hooseeyo iyo kuwa dhaqaalahoodu dhexdhexaadka yahay. Kooxo ka tirsan hey-adda Swiss TPH ayaa waxa ey ka shaqeynayaan fikrado cusub sida barnaamijka ALMANACH oo kale waxa eyna isku xirayaan cilmi baarista, waxbarashada iyo adeegyada dhaqangalinta gudaha, heer qaran iyo heer caalami. Ujeedkeennu waxa uu yahay in sayniska iyo waxyaabaha cusub ee soo kordha aan saameyn wanaagsan u yeelno si aan u suurogalinno helidda daawooyin iyo tallaaf aad u wanaagsan oo aan gaarsiino dadka, bulshooyinka, iyo dadka go'aannada qaata hab aan ku hagaajin karno caafimaadka guud ahaan aduunka.



Xarunta taariikhiga ah ee hey-adda Swiss TPH ee magaalada Basel Basel

Qiyaastii 850 qof oo kasoo kala jeeda 80 dal ayaa ka shaqeeya hey-adda Swiss TPH, iyaga oo diiradda saaraya cudurrada la isku gudbin karo iyo kuwa aanan la isku gudbin Karin, deegaanka, bulshada iyo caafimaadka iyo sidoo kale nidaamyada caafimaad ee jira.

Sanadka 2020, hey-adda Swiss TPH ayaa maamuleysa in ka badan 285 mashruuc in ka badan 100 wadan. Barnaamijka ALMANACH ee Soomaaliya ayaa ka mid ah mashruucyadaas.


# ALMANACH IYO BULSHADA

Barnaamijka ALMANACH waa barnaamij ku cusub Soomaaliya oo u baahan bulshadu in ey taageeraan eyna dareemaan in ey iyagu leeyihiin. Si arintan loo xaqiijiyo, ayaa kooxda barnaamijka ALMANACH waxa ey sameeyeen olole lagu wacyi galinayo bulshada si kor loogu qaado fahamka bulshada ee barnaamijkan. Kooxda barnaamijka ALMANACH waxa ey marka hore wacyigalin u sameeyeen shaqaalaha xarunta caafimaad (kalkaaliyeyaasha, ololeeyeyaasha caafimaad, guddiyada bulsho ee caafimaadka (CHCs) iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada ee dumarka ah (FCHWs) iyaga oo isticmaalaya qalab waxbarasho oo kala duwan oo loo sameeyay barnaamijka (sabuuro iyo sawirro). Intaa kadib, ayaa ololeeyeyaasha caafimaad oo ey la jiraan CHCska and FCHWska ayaa waxa ey sameeyeen jadwal lagula kulmayo bulshada si looga dhaadhiciyo barnaamijka ALMANACH. Doodda ayaa waxa ey ku saabsaneyd cidda ka faa'iideysaneysa iyo faa'iidada uu leeyahay barnaamijka ALMANACH, iyada oo la isla soo qaaday sheekada Bishaara oo ah gabar ka soo muuqatay shaxda dadka wax lagu tusayay si loo dhaliyo dood bulsho sidoo kalena loo soo dhaweeyo waxyaabaha ey u soo joogeen iyo xaaladaha ey la kulmeen. In aan helno falcelinta iyo aragtida bulshada aad ayey muhiim noogu tahay si aan u hormarino barnaamijka. Ka qeyb galinta bulshada ee barnaamijka ma ahan wax inta hal mar la sameeyo kadibna halkaas ku dhammaada, waa howl mar walba ka socota saddexda xarun caafimaad. Ujeedkuna waxa uu yahay in la helo bulsho fahmeysa, taageereysa, sidoo kalena ka faa'iideysaneysa barnaamijka.


## WAA MAXAY ALGORITHM?

Marar badan ayaad maqashay in barnaamijka ALMANACH uu ku shaqeeyo waxa loo yaqaanno algorithms laakiin su'aasha ayaa ah waa maxay algorithm? Algorithmku waa tallaabooyin dhowr ah oo la raacayo si loo dhameystiro howl. Xitaa habka loo sameynayo doolsho shukulaato ka sameysan ayaa noqon kara algorithm: Maxaa yeelay waxbaa la isku dardarayaa (ingredients) kadib ayaa wax ka soo baxayaan (the chocolate cake). Waxa aan dhihi karnaa algorithmku waa "tallaabooyin dhowr ah". Sida iska cad, shaxda caafimaad ee uu ka sameysanyahay barnaamijka ALMANACH wey ka dhib badantahay habka la raacayo marka la sameynayo doolsho shukulaato ka sameysan laakiin ujeedka ayaa isku mid ah.

### SHAXDA LAGU DIYAARINAYO DOOLSHO KA SAMEYSAN SHUKULAATO



**SHAXDA LAGU HELO DHIIG YARIDA EE ALMANACH**



Haddii ey ku soo jiidatay xogtan kooban, ama aad heyso talo ama su'aal, amaba aad dooneysid in aad nala shaqeyso, ha ka labalabeynin! Email ama farriinta gaaban ee whatsappka ayaad u qori kartaa Hasan Ali: [habdulahiali@icrc.org](mailto:habdulahiali@icrc.org); WhtasApp +254 722 409106

*ALMANACH dadka ayaa si kalgaceyl leh loogu sameeyay Kooxda ALMANACH*

ICRC Somalia Delegation  
 Denis Pritt Road  
 P.O. Box 73226 - 00200  
 T +254 20 2719 301  
 Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Beledweyne and Hargeisa.  
[www.icrc.org](http://www.icrc.org)  
 Cover photo: Mohamed Ahmed/SRCS  
 © ICRC, Maajo 2021

Guddiga caalamiga ah ee laanqeyrta cas ICRC waxay caawisaa dadka ku nool adduunka ee ay saameeyeen iska horimaadyada hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha ah, iyagoo sameynaya wax kasta oo ay awoodaan si ay u ilaashadaan sharaftooda una yareeyaan dhibkooda, inta badan Ururka Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. wuxuu kaloo raadinayaa inuu ka hortagto dhibaatooyinka iyadoo la dhiirigelinayo laguna xoojinayo sharciga bini'aadnimada iyo in lagu guuleysto mabaadiida bin aadnimada ee caalamiga ah.

[facebook.com/ICRCAfrica](https://facebook.com/ICRCAfrica)  
[twitter.com/ICRC\\_Africa](https://twitter.com/ICRC_Africa)

[instagram.com/icrc\\_afrique](https://instagram.com/icrc_afrique)  
[blogs.icrc.org/Somalia](https://blogs.icrc.org/Somalia)